

Coronavirus **COVID-19**



International Protection Accommodation Services (IPAS) COVID-19 Update Wararka COVID-19 ee Cusub



An Roinn Dlí agus Cirt
agus Comhionannais
Department of Justice
and Equality

14 Ogosto 2020

Wararkii ugu dambeeyay ee COVID-19 ee loogu talagalay degganeyaasha - Cadadka 21

Degganeyaasha Qaaliga ah,

Fadlan hel cadadka ugu dambeeyay ee warsidahaaga. Cadadkan wuxuu diirada saarayaa talaabooyinka sahlan ee aan dhamaanteen qaadi karno si aan u ilaalino qoysaskeena iyo asxaabteena iyo aan uga hortageyno ku faafida COVID-19 bulshadeena.

Warsidahan sidoo kale waxaa laga heli karaa [websaydka](#) xarumaha hoyga qaybta 'Degganeyaasha' oo ay weheliso daabacadihii hore ee ka hadlay mawduucyo ah sida ilaha waxbarashada iyo caafimaadka iyo talada fayoaqabka.

Fadlan nala soo socodsii mawduucyada aad jeceshahay inaad ku aragto warsidayaasha mustaqbalka adiga oo noogu soo dira email ipasinbox@justice.ie.

Ugu dambeysta, waxaan jeclaan lahayn inaan kaaga mahadcelinno iskaashigaaga socda iyo aan kuu rajeynayno caafimaad wanaagsan.

Kooxda IPAS

Khad-caawin Taleefan-lacag-la'aanta ah ee Deganeyaasha - 1800 929 008

Khad-caawin Taleefan-lacag-la'aan ah ayaa loo sameeyay in lagu taageero deganeyaasha inta uu jiro COVID-19. Waan fahamsanahay in qof walba uusan ku qanacsaneyn inuu si toos ah ula xiriiro Waaxda sidaas darteed waa wax muhiim ah in la ogaado inkastoo ay IPAS sameysay khadkan caawinta, waxaa maamula hay'ad samafal ah - Adeegga Qaxootiga ee Jesuit (Jesuit Refugee Service) (Ireland).

Wararkii ugu dambeeyay ee COVID-19 ee loogu talagalay dagganayaasha - Cadadka 21

Si looga hortago faafida COVID-19, dhowr talaabooyin dheeraad ah la sameeyey gobollada Kildare, Laois iyo Offaly.



Tallaabooyinka dheeraadka ah ayaa la sameeyey laga bilaabo habeen barka Jimcaha 7 Ogosto ilaa habeen barka Axadda 23 Ogosto.

Xaaladda markaa ka dib ayaa loo eegi doonaa.

Haddii aad deggan tahay Kildare, Laois ama Offaly, waa inaad keliya ku safartaa degmadaada dhexdeeda.

Waxa keliya ee ka reeban taasi waa:


- Inaad u safarto shaqada iyo aad ku labaneyso guriga;
- Inaad u safrayso ujeedooyin shaqo ah; iyo
- Inaad tageyso ballamada caafimaad iyo aad u soo qaadato dawooyin ama alaabada kale ee caafimaadka.

Si aad u hesho liisto buuxda ee talaabooyinka laga sameeyey gobollada Kildare, Offaly iyo Laois, fadlan booqo gov.ie.

Wararkii ugu dambeeyay ee COVID-19 ee loogu talagalay dagganayaasha - Cadadka 21

Marka aan barano inaan la noolaano COVID-19, qof walba waxaa lagu dhiirigelinayaa inay adeegsadaan xukunkooda oo ay qaadaan mas'uuliyad shaqsiyadeed ilaalinta naftooda iyo dadka kale.

Qof walbaa waa inuu ogaadaa waxyaabaha halista ah ee qaadida COVID-19:



- **Masaafada** – Khatarta ah in lagu qaado COVID-19 ayaa sii kordheysa iyadoo masaafada idiin dhaxaysa adiga iyo dadka kale ay sii yaraato. Ilaali 2 mitir ah kala fogaan meeshii ay suurtagal tahay.
- **Waxqabadka** – Sida aad wakhtiga ula qaadato dadka iyo waxa aad la sameynayso waxay kordhin kartaa halista aad ku jirto. Raac [Tilmaamaha Ku Sugnow Badbaado](#) ee dowlada ka socda marki aad wakhti la qaadaneyso dadka kale.
- **Wakhtiga** – Marka aad wakhti badan oo isku dhawaansho ley la qaadato dadka kale waxay kordhin kartaa halista ah inaad qaado COVID-19. La soco cidda aad wakhti la qaadaneyso iyo sida aad ula qadaato.
- **Deegaanka** – Joogida meelaha banaanaada ah ayaa ka badbaado badan joogida meelaha gudaha ah. Marka ay suurtagal tahay, kula kulan dadka kale meelaha banaanaada ah. Haddii ay taasi suurta gal ahayn, fur daaqaadaha iyo albaabada marka aad dadka kale kula kulmaysid meel gudaha ah.
- **Astaamaha** - Baro astaamaha. Haddii aad qabto astaamaha is-geli go'dooni oo isla markiiba la xiriir dhakhtarkaaga.

Ogow astaamaha COVID-19

COVID-19 waa cudur cusub oo saamayn kara sambabahaaga iyo marinnada hawada. Waa wax muhiim inaad ogaato astaamaha si aad naftaada iyo dadka kale u badbaadiso.

Waxay yihiin:

- [qandho \(heerkul sarreeya\)](#)
- [qufac](#) - kani wuxuu noqon karaa nooc walba ee qufac ah, ma aha qufac qalalan keliya
- [neefsasha oo gaabta](#) ama dhibaatooyinka neefsashada
- [lumitaanka ama isbeddelka dareenkaaga wax urinta ama dhadhanka](#)
- astaamo u eg astaamaha hargabka

Haddii aad isku aragto wax astaamo ah, waa inaad [is-gelisaa go'dooni](#) oo aad wacdaa dhakhtarkaaga isla markiiba si [laqaa baaro COVID-19](#).

Tallooyin si looga hortago faafida COVID-19

Waxaa jira dhowr talaabo oo aad qaadi karto si looga hortago faafida COVID-19.

Kuwaasi waxaa ka mid ah:

- Ugu dhaq Gacmahaaga si joogto ah saabuun iyo biyo ama adigoo isticmaalaya nadiifiyaha alkulada leh haddii aysan gacmahaagu u muuqan inay wasaq yihiin;
- Ku dhaqan nadaafad wanaagsan ee xagga neefsashada ah, taas oo ah, markii aad qufacayso ama hindhisayso, ku dabool afkaaga iyo sankaga suxulka oo laaban ama tiish - ku tuur tiishka isla markiiba weel qashinka oo xiran oo gacmahaaga ku nadiifi nadiifiyaha alkulada leh ama saabuun iyo biyo;
- Joogtay kala fogaansho jireed, taas oo ah, isu dhexeysii ugu yaraan 2 mitir (6 fiit) masaafad ah naftaada iyo dadka kale, gaar ahaan kuwa qufacaya, hindhisaya oo qandhada qaba; iyo
- Ka fogow taabashada indhahaaga, sankaga iyo afkaaga - haddii aad ku taabato indhahaaga, sankaga ama afkaaga gacmo wasakhaysan/jeemiyeesan, waxaad fayraska uga gudbin kartaa gacantaada oo u gudbin kartaa naftaada.

Tallaabada ugu muhiimsan ee aan dhammaanteen qaadi karno si aan nafteenna uga ilaalino COVID-19 waa in gacmaha si joogto ah loo dhaqdo iyo nadaafadda neefsashada ee wanaagsan. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan eeg tilmaamaha-talaabo-talaabadda ah ee HSE ee [sida loo nadiifiyo gacmahaaga](#).



Waji Daboolada



Laga bilaabay Isniinta, 10 Ogosto, waa inaad ku xirataa weji daboolaha:

- gudaha gaadiidka dadweynaha; iyo
- gudaha dukaamada, xarumaha dukaamada iyo meelaha kale ee meel gudaha ah - [eeg liiska buuxa ee goobaha.](#)

Xirashada waji daboolada waxay caawisaa ka hortaga ah dadka aan ogeyn inay qabaan COVID-19 inay qaadsiiyaan dadka kale.

Barnaamijka La-socodka COVID (COVID Tracker)

Dhamaan degganayaasha waxaa lagu dhiiri galinayaa inay soo degsadaan App-ka COVID Tracker ee cusub, waa barnaamij lacag la'aan ah ee loogu talagalay taleefankaaga gacanta.


Wuxuu naga caawin kartaa inaan iska ilaalino oo aan yareeno ku faafida COVID-19 Ireland.

Adeegsiga App-ka COVID Tracker oo uu weheliyo tillaabooyinka caafimaadka dadweynaha ee jira waxay naga caawin karaan inaan dhamaanteen ku sugnaano badbaado marka aan kulanno, is dhex galno, Shaqada ku jirno ama safar galno.

App -ka wuxuu awoodi in uu:

- Ku siiyo digniin haddii aad la lahaatay xiriir dhow qof laga helay COVID-19;
- Ku siiyo talo ah waxaad samayn lahayd si aad u ilaaliso naftaada iyo dadka kale; iyo
- Siiyo diginin isticmaaleyaasha kale ee barnaamijka/app-ka ee aad la yeelatay xiriir dhow, haddii lagaa helo COVID-19.

Fadlan riix [halkan](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo soo degisto barnaamijka/App-ka.



Fayo-qabka Maskaxda

Faafida COVID-19 waa dhacdo cusub oo dhibaato leh. Nolasha qof walba iyo waqabadyadiisa maalinlaha ah waxaa saameeyay tilaabooyinka la soo dajiyey si loo hor istaago faafida fayriska, oo aan dhamaanteen ku jirno badbaado.

Waa wax caadi ah in laga walwalo ama la dareemo walaac inta lagu jiro wakhtigan adag, laakiinse waxaa jira waxyaabo badan oo aan sameyn karno oo naga caawinaya inaan maskaxda ku heyno caafimaadka iyo fayo-qabka maskaxdeena:

- La hadal dadka aad ku kalsoon tahay. La xiriir asxaabtaada iyo reerkaaga.
- Isku day inaad sii wado qaab nololeed caafimaad leh adigoo si fiican wax u cunaya, helaya hurdo kugu filan iyo jimicsi.
- Hubi inaad dibadda u baxdo ugu yaraan hal mar maalintii si aad u hesho hawo nadiif ah oo ku socsoco meelaha.
- Ka fogow sigaar cabida ama isticmaalka qamriga ama daroogada kale si aad ula tacaasho dareenkaaga.
- Ha dhagaysan wararka beenta ah ee ku saabsan COVID-19. Ka hel warar iyo macluumaad lagu kalsoonaan karo [HSE](#), [Dowlada Irishka](#) iyo [Hay'ada Caafimaadka Aduunka](#).



- Yaree wakhtiga adiga iyo qoyskaaka aad ku wada daawataan ama dhageysataan warbaahinta ku saabsan COVID-19. Helitaanka wararka cusub hal jeer ama laba jeer maalintii waa wax kugu filan.
- Adeegso xirfadiha aad adeegsatay xilliyadii hore ee kaa caawiyay inaad maareeyso caqabadaha. U adeegso xirfadahaas si ay kaaga caawiyaan inaad maareeyso dareenadaada inta lagu jiro cudurka faafa.
- Haddii aad dareento culeys, kala hadal saaxiib, qof aad isla degentihin, xubin ka mid ah shaqaalaha xaruntaada ama dhakhtarkaaga. Qorshe sameyso oo ogow meesha aad gargaar u tagi karto si aad ugu hesho caawin baahiyahaaga caafimaad ee jirka iyo maskaxda.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daryeelka fayo-qabka maskaxdaada, fadlan riix [halkan](#).

Taageerada Dheeraadka ah ee La Heli Karo

Laca-bixinta Faa'iidada Jirada ee COVID-19

Lacag-bixintan waxaa loogu talagalay shaqaalaha iyo kuwa iskaa-u-shaqeystayaasha ee aan shaqeyn karin muddo gaaban sababtuna tahay in la xaqiijiyey caafimaad ahaan inay is-go'doomiyaan ama ay u jiran yihiin cudurka COVID-19.

Lacag-bixinta Shaqo Ku-beelida Cudurka Faafa ee COVID-19

Lacag -bixinta Shaqo Ku-beelida Cudurka Faafa ee COVID-19 waa lacag bixin degdeg ah oo ay soo bandhigtay Dowladda oo loogu talagalay in lagu magdhabo shaqaalahaas oo ay loo shaqeeyayaashooda aan ku hayn karin mushahaar bixintooda.

Degganeyaasha ku nool xarumaha Direct Provision waxay u qalmaan inay codsadaan lacag-bixinta Faa'iidada jirada ee COVID-19 iyo Lacag-bixinta Shaqo Ku-beelida Cudurka Faafa.

Sida ugu fudud ee ay degganeyaashu u codsan karaan waa online-ka ee laga helo www.MyWelfare.ie.

Kaararka Deganaanshaha ee Ku Meelgaarka ah (TRC-yada)

Qaban-qaabada cusub ee ku saabsan cusboonaysiinta Kaararka Deganaanshaha Ku-meelgaarka ah (TRCs) waxaa la soo gabagabeynayaa toddobaadkan lagu jiro, iyada oo ujeedadu tahay in ay shaqeyso toddobaadka dambe.

Ogeysiisyo ku saabsan saameyntan waxaa lagu soo dhajin doonaa websaydka IPO waxaana la ogeysiin doonaa dhammaan Xarumaha Direct Provision.

Tilmaamaha Dib U Furida Dugsiyadeena

Waaxda Waxbarashada iyo Xirfadaha (DES) ayaa dhowaan daabacday tilmaamo la xiriira 'Dib U Furista Dugsiyadeena'. Tani waxaa laga heli karaa gov.ie/backtoschool.

Tilmaamahan waxaa loogu talagalay dugsiyada laakiinse waxaa ku jira qaar macluumaad ah oo aad u faa'iido badan oo laga yaabo inaad jeclaan laheyd inaad ogaato. Fadlan qaado wakhti aad ku aqriso si aad uga war qabto horumarada dhacaya.

Waxaad ogaan doontaa in bogga 33 ee tilmaamaha, 'Dib U Furista Dugsiyadeena – Khariida-wadada Dib-ugu-laabashada Si Buuxda Dugsiga' wuxuu ka hadlayaa gaadiidka dugsiga. Iyadoo caruurta dhigta dugsiga hoose LOOGAMA baahna inay xirtaan maaskarada-wajiga, tilmaamaha waa wax si aad ah ku cad in ardayda ku safraya qorshaha dugsiga-hoose kadib WAA looga baahan yahay inay xirtaan maaskarada-wajiga inta ay sugayaan iyo ay saaran yihiin adeega gaadiidka. Si taas loo gaaro, waxaan kugu mahad-celinayaa haddii aad hubin karto saad ku filan oo maaskarada-wajiga ah uu jiro, tusaale ahaan carruurta dhigata dugsiga hoose kadib, waa in loo diyaariyo maaskarada subax walba ka hor inta aysan safka u galin inay koraan baska dugsiga.

Ardayda dugsiga hoose kadib waxaa sidoo kale looga baahan yahay inay xirtaan maaskaro gudaha dugsiga inta lagu juro maalinta.

Qaban-qaabada in carruurta si badbaado leh loogu geeyo dugsiyadeenna waxay muujinayaan dhowr shuruudood oo loogu talagalay kuwa ku safraya gaadiidka dugsiya. Waxaad laga yaabaa inaad jeclaato inaad wax ka ogaato shuruudahaas. Kuwaa waxaa ka mid ah:

- aysan adeegsan gaadiid haddii ay isku arkaan calaamadaha COVID-19;
- joogteeyaan kala fogaansho bulshadeed inta ay sugayaan gaadiidka;
- had iyo jeer fariistaan kursiga horay loogu qoondheeyey oo uu la socdo 'saaxiibkooda baska' oo lala fariisin doono - ilmaha wuxuu noqon doonaa ilmo la dhashay ama ilmo ka socda kooxda fasalkooda (ilmaha waa inuu ahaadaa isla ilamihii marwalba);
- isticmaalka gacmo-nadiifiye marka la korayo baska; ilaaliyaan akhlaaqda neefsashada (adeegsiga tiish, daboolida qufaca iyo hindhisada) marwalba inta la sugayo iyo inta la saaran yahay adeega gaadiidka; iyo
- uga tagista baska mid mid si hab nidaamsan.

Bogga 49 wuxuu ka hadlayaa u diyaarinta DES hakis gaaban waalidiinta ee labadaba heer ee dugsiya hoose iyo dugsiya hoose kadib ee carruurta ku soo laabanaya dugsiya iyo agabyada macluumaadka ku habboon da'da ee loogu talagalay ardayda ee ka hadlaya ku noqoshada dugsiya. Dukumiintiyadaa waxaa lagu dari doonaa warsidaha soosocda, diyaarintooda iyo qeybintooda kadib.

Waxaa ku jira bogga 45 qaar tixraacyo ah oo ku saabsan qabanqaabada loo sameeyey ardeyda aan awoodin inay dugsiya tagaan oo laga yaabo inaad sidoo kale jeclaan laheyd inaad ogaato.

Hagistan ayaa sheegaya in carruurta leh astaamaha COVID-19 ama carruurta halista ugu weyn ugu jira COVID-19 aysan tagin dugsiya.

Marka ay tahay caruurta halista ugu weyn ugu jira COVID-19, sabtuna tahay xaalad caafimaadeed ee kale sida lagu qeexay HSE, fadlan eeg xiriirka/linkiga: <https://www2.hse.ie/conditions/coronavirus/people-at-higher-risk.html#very-high-risk>.

Waa in xiriir toos ah lala sameeyaa dugsiya si loo sameeyo qabanqaabinta loo baahan yahay si loo siiyo taageero.

Isbeddelada Qorshaha Taageerida Ardayga

Isniinta, 10ka Ogosto, Wasiirka Waxbarasha Sii Dheer iyo Sare, Cilmi baarista, Hal-abuurida iyo Sayniska, Simon Harris TD, wuxuu ku dhawaaqay isbeddelada Qorshaha Taageerida Ardayga ee loogu talagalay dadka ku nool Direct Provision.

Dib-u-eegis kadib, Wasiir Harris wuxuu xaqiijiyey in shuruudaha qorshaha la sahlin doono oo qorshaha lagu dejin doono wakhti dheer.

Shuruudda ah in looga baahan yahay codsiyada mustaqbalka in uu qofka ka qeybgalay sedex sano oo waxbarasho oo ah nidaamka dugsiga ee Irishka iyo in uu helay Shahaadada ku noolaanshaha wadanka, dib dambe looma baahnaan doono. Codsadayaasha mustaqbalka waa inay weli buuxiyaan shuruudaha ah inay ku jiraan ilaalin ama ku jiraan habsocodka inay joogaan muddo saddex sano ah.

Isaga oo ka hadlaya isbeddelada, Wasiir Harris wuxuu yiri: *“Dowladda waxaa ka go’an inay habab cusub oo muddo dheer ah u soo saarto Direct Provision. Tani waxay qaadan doontaa wakhti si loo hirgaliyo laakiinse inta lagu gudajiro, waxaan sii wadi doonnaa inaan horumarin u sameyno degganeyaasha degan Direct Provision.”*

“Sahlinta shuruudaha loogu talagalay qorshaha taageerida ardayga waxaan rajeyneynaa inay keento in dad badani ay helaan waxbarasho heerka saddexaad ah.”

Taariikhda xiritaanka codsiyada 2020/21 waa **6 Noofembar 2020**. Arday kasta oo horey u codsaday taageerid ka mid ah qorshaha, codsiyiisa/codsigeeda dib ayaa loo eegi doonaa iyada oo la raacayo qorshaha cusub ee leh xaaladdo wanaagsan.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan taageerooyinka cusub iyo sida loo codsado, fadlan riix [halkan](#).

Degganeyaasha Sharciga leh

Miyaad leedahay xaalad sharci? – Ogow sida aad ugu guuri kartid gurigaaga kuu gaarka ah.

Haddii aad haysato xaalad sharci ah oo aad jeceshahay inaad ka gurto Direct Provision, Peter McVerry Trust iyo Depaul ayaa ku caawini kara.

Peter McVerry Trust

Adeega dib-u-dajinta ee Gobolka Koonfur ee Peter McVerry Trust ayaa ku caawini doonta haddii lagu siiyey xaalad sharci oo ah inaad ku noolaatid Ireland laakiinse hadda aad deggan tahay xarumaha Direct Provision ee Clare, Cork, Dublin, Kerry, Kildare, Laois, Limerick, Longford, Offaly, Tipperary, Waterford, Wicklow, Westmeath iyo Wexford.



Shaqaalahooda ee dib-u-dajinta ayaa kugu caawini doona inaad hesho guri ama guri daabaq ah oo haboon. Waxay sidoo kale kugu caawini doonaan inaad xirriir la sameyso mulkiilayaasha-guri iyo wakiilada guryaha.

Si aad ula xiriiro Adeega dib-u-dajinta ee Gobolka Koonfur ee Peter McVerry Trust, fadlan u dir imayl asresettlement@pmvtrust.ie

Cosán Nua

Cosán Nua waa dib-u-dajinta Depaul iyo adeega isdhexgalka bulshada. Way ku caawini doonaan haddii lagu siiyey sharci ah inaad ku noolaato Ireland laakiinse hadda aad deggan tahay xarumaha Direct Provision ee Dublin, Meath, Sligo, Galway, Monaghan, Mayo, iyo Louth. Waxay kugu caawinayaan inaad u guurto goobaha aad doorbideyso ee Jamhuuriyada Ireland.

Si aad ula xiriiro Depaul fadlan weydii maamulaha xaruntaada macluumaadka xiriirinta shaqaalaha kiiskaaga ee Depaul ama u dir imayl cosannua@depaulcharity.net

Meeshayda ee Aan Ku Ciyaaro (My Place to Play)

Luuliyo, Xirmooyin ah Meeshayda ee Aan Ku Ciyaaro (My Place to Play) ayaa loo qaybiyey xarumaha hoyga, iyadoo lala kaashanayo Guddiyada Adeegyada Carruurta iyo Dhallinyarada (Children and Young People's Service Committees (CYPSC)) iyo Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta (Children's Rights Alliance).

Xirmooyinka Meel lagu Ciyaaro (Place to Play) ayaa si wanaagsan u soo dhoweeyeen degganeyaasha. Waa kuwan dhowr sawirro oo degganeyaasha Monaghan oo ku raaxeysanaya xirmooyinkooda ciyaarta.



Fadlan noogu soo sheeg IPASinbox@justice.ie haddii ay jiraan mowduucyo kale oo aad jeclaan lahayd inaan ku soo darno wargeyskeena. Waxaan rajeyneynaa in macluumaadka halkaan lagu bixiyey ay ahaayeen mid wax tar leh.

Iyadoo aan kuu rajayneyno rajo aad u wanaagsan oo ka socda kooxda IPAS iyo Waaxda Caddaaladda iyo Sinaanta.



An Roinn Dlí agus Cirt
agus Comhionannais
Department of Justice
and Equality

Macluumaadka ku qoran warbixintan ugu dambaysay waxaa loogu talagalay degganayaasha xarumaha hoyga IPAS, Saaxiibada Kooxaha Xarunta (Friends of the Centre Groups) iyo asxaabta NGO-yada. Wixii su'aalo ah ama fikrado ah waxaa loo diri karaa IPAinbox@justice.ie